# DHICINTA

the women's
the royal women's hospital
victoria australia

Macluumaadkani wuxuu ku saabsan yahay waxa dhaca markay xaqiiq tahay inaad dhicisay ama aad dhicineysid. Haddii aad dareemeysid xannuun iyo dhiigis laakiinse aan la ogaan in ilmo kaa soo dilmay akhri warqada xaqiiqada ee Dhiigista iyo Xannuunka Uurka wakhtiga hore.

## Wax ku saabsan dhicinta

Dhicintu waxay dhacdaa marka ilmuhu oo joojiyo koritaanka. Ugu danbeyntii, unuga uurka ayaa jirka ka soo dhamaada. Dumarka qaarkii waxay dareemi doonaan casiraad, xannuun sida kan caadada oo kale ah iyo xaaladaha badidooda waxaa jiri doona ka dhiigitaanka ferjiga.

Dhicintu waa wax caam ah toddobaad ugu horeeya uurka. Cilmi baaris ayaa muujineysaa ilaa hal shantii dumar ahba, ee og inay uur leeyihiin, way dhicin doonaan ka hor 20 toddobaad. Badiba kuwani waxay dhacaan 12ka toddobaad ee ugu horeeya.

Heerka dhabta ah ee dhicinta xitaa way ka sareeyaan sababtoo ah dumarka qaarkood waxay leeyihiin dhicinta ugu horeysa iyagoon garan inay uur leeyihiin.

Marka dumarku ay dhiciyaan saddex jeer ama ka badan, baaritaano ayaa la sameyn karaa si loo raadiyo waxa sababaya. Baaritaanka lama siiyo dumarka dhiciya hal mar ama laba jeer sababtoo ah waxay aad ugu badan tahay inaan waxba la helin.

## Maxaa keena dhicinta?

Badanaa lama helo sabab lagu daaweyn karo dhicinta. Cilmibaaristu waxay noo sheegaysaa in kala badh dhammaan dhicintu inay dhacdo sababtoo ah koromosoomka ku jiro ugxansidaha baan caadi ahayn uurkuna bilowgiiba si hagaagsan uma koro. Xaaladaan, dhicintu waa habka dabiiciga ah siduu ula dhaqmo ugxansidaha aan caadiga ahayn.

Waxba lama qaban karo lagaga hortegaayo dhicintu inay dhacdo haddii uurku uu u koraayo si aan caadi ahayn.

Dhicintu waa wax badanaa caam ku ah dumarka waaweyn marka loo eego kuwa yaryar, waxaana badanaa sabab u ah koromosoonka oo cilada badan marka da'du sii korodhaba.

Dhicintu waxay sidoo kale caam ku tahay dumarka sigaarka caba iyo dumarka caba khamrada saddex cabitaan wax ka badan toddobaadkiiba 12 toddobaad ee ugu horeeya uurka. Cilmi baaristu waxay ku talineysaa dhicintu inay sidoo kale caam ku tahay dumarka caba wax ka badan 500mg oo kafeyn ah maalintii; tani waa qiyaastii saddex ilaa shan koob oo kafee ah.

Qaar ka mid ah xaaladaha caafimaad ee hooseeya, sida sonkorta aan la kontoroolin, dhibaatooyinka qanjirka thaaroodhka ama fibroids, ayaa horseedi kara dhicinta. Xaalado caafimaad oo dhif ah oo saameeya xinjirowga dhiiga ayaa sidoo kale sababi kara dhicinta. Dumarka dhiciyey saddex ama wax ka badan oo iskuxiga waa in laga jeegareeyaa xaaladahaan.

## Maxaad sameyn kartaa si aad uga hortagtid dhicinta?

Ilaali caafimaadkaaga guud; sigaar ha cabin, wax ka bedel qaadashada kafeynta, iska ilaali aalkohoolka iyo meeshii suurtagal ah iska ilaali xiriirka kuwa kale ee qaba jirada caabuqa daran. Badanaa uurka ku xigaa wuxuu noqonayaa mid caadi ah, laakiinse haddii saddex jeer oo isku aad dhiciso waxaa lagu talinayaa baaritaano dheeraad ah in la sameeyo.

## Sidee baa loo ogaadaa dhicinta?

Dumarku waxay ku doontaan dareyeel caafimaad heerar kala duwan; marmarka qaarkood dhicinta way dhacday, marmarka qaarkoodna haddayba bilaabantay. Astaamo laysu geeyey (sida xannuun iyo dhiigid), baaritaanka waxa lagu helaa ultrasound iyo baaritaanka dhiiga oo xaqiijin doona haddii aad qabtay, ama aad hadda dhicineysid (eeg warqada xaqiiqda Xannuunka iyo dhiigista uurka wakhtigiisa hore). Dhicinta waxaa badanaa lagu ogaadaa mid dhammeystirmay, aan dhammaan ama midka la gafey:

- Dhicintu waa dhammaatay marka dhammaan unugyada uurku ay soo baxaan
- Dhicintu ma dhammeystirna marka qaar ka mid ah unugyada uurku ay baxaan, laakiinse ay qaar weli ku jiraan ilmogaleenka
- Dhicinta la gefay waa marka uurku uu istaago koritaanka laakiinse unugu uusan soo bixin oo ilma galeenka ay weli ku jirto.

## Yaan caawimaad kala xiriiraa?

### Doorashooyinka xiriirka guud

- GP-gaaga
- Adeega caawimaad bulshada
- Waaxda xaalada degdegta ah ee kuugu dhow
- Adeega qiimeynta uurka hore ee kuugu dhow
- Kalkaalisada laga waco – 1300 60 60 24

### Doorashooyinka Isbitaalka Dumarka ee Royal Women's Hospital

*Wixii qiimeyn ah, baaritaano iyo daaweynta dhicinta suurtagalka ah:*

**Adeega Qiimeynta Uurka Hore (EPAS)**
T: (03) 8345 3643
Isniinta ilaa Jimcaha laga bilaabo 8.00 subaxnimo ilaa 3.00 galabnimo.
Waxaa laga yaabaa inaad kaga taktid faafaahin mishiinka jawaabaha laakiinse qof ayaa ku soo wici doona.

Soo qaad wixii macluumaad ah iyo natiijooyinka baaritaanada ee uurkan markaad timaadid.

**Xarunta Xaaladda degdega ah ee Dumarka (24kii saacadood)**
Imow wakhti kasta haddii aad u baahan tahay daryeel degdeg ah. Haddii aad u baahan tahay ultrasound, badanaa waxaa loo baahan yahay in laga balamiyo rugta caafimaakd EPAS ee ku xigta ee la helayo.

*Wixii taageero maskaxeed ah ama qof ka hadla sidaad dareemaysid*

**Adeegyada Taageerada Bulsho ee Dumarka**
T: (03) 8345 3050 (saacadaha xafiiska)

**Pastoral Care and Spirituality Services**
T: (03) 8345 3016 (saacadaha xafiiska)

**Saacadaha shaqada ka dib wac shantaraalka isbitaalka**
T: (03) 8345 2000 oo weydii inaad la hadashid qof ka socda Adeegyada Taageerada Bulshada ama Daryeelka Wadaadada.

### Waraaqaha xaqiiqda ee la xiriira ee website ka dumarka

- Ka dib markaad dhiciso
- Daaweynta dhicinta
- Xannuunka iyo dhiigista uurka hore

**AFEEFTE** Xaashidaan xaqiiqada waxay bixisaa macluumaad guud keliya Tala mucayina oo ku saabsan ilmahaaga ama baahida daryeelka caafimaad, waa inaad raadisaa talada aqoonyahanada caafimaadka Isbitaalka Royal Women's Hospital ma aqbalo wax masuuliyad ah oo lumitaan ama khasaaro ah oo ka timaada ku tashiga xaashidaan halkii aad ka arki lahayd aqoonyahan caa imaad. Haddii ilmahaaga yari u baahan yahay ka warhayn caa imaad oo degdeg ah la xiriir qaybta xaalladaha degdegta ah ee kuugu dhow.
© The Royal Women's Hospital 2020